

Magacaabisyada u furan abaalmarinta ugu sareysa ee Alberta

Janaayo 5, 2023

Dadka ree Alberta waxaa lagu dhiirigalinaya in ay magacaabaan muwaadiniinta, hogaamiyeeyasha iyo mufakiriinta si ay xubin uga noqdaan Alberta Order of Excellence.

Ilaa 10 qof ayaa lagu dari doonaa Xeerka(Order) sannadkaan ayada oo loogu aqoonsanaayo waxtarkooda muhiimka ah ee ay tareen bulshadoda, gobolka iyo kasii badanba.

Magacaabista waxaa la qabanaya sannadka oo dhan laakiin waa in la helaa ugu danbayn febraayo 15keeda si loogu tiixgaliyo abaalmarinta sannadkaan. Magacaabisyada aan la xulan 2023 waxaa la tiixgalin doonaa ilaa saddex sanno.

Qofka la magacaabay waa in uu noqdaa muwaadin reer Canada ah kaasoo wakhti xaadirkaan degfgen gudaha Alberta iyo, haddii la doortana, waa in uu awood u leeyahay in uu kasoo qayb galu xafaladda abaalmarinta. Dadku ma magacaabi karaan naftooda, lammaannahooda ama xubin kamid ah qoyskooda aadka ugu dhow.

Macluumaadka ku saabsan Xeerka (Order), oo ay kamid yihiin habraacyada magacaabista, foomamka magacaabista iyo macluumaadka qofka ee dadkii horey uga mid noqday waxaa laga heli karaa websaytka [Alberta Order of Excellence](#).

Macluumaadka la xiriira

[Alberta Order of Excellence](#)

Weydiimaha saxaafadeed

Gary G. Mar
mar@cwf.ca
587-897-3311
Guddoomiyaha,
Guddiga Alberta Order of Excellence

Gayle Stannard
gaylest@telus.net
780-953-4020
Agaasinka Fulinta,
Alberta Order of Excellence